



Siistemka Digniinta Argagixisada Qaranka National Terrorism Advisory System

Wargelinta

www.dhs.gov/advisories

TAARIKHDA LA SOO SAARAY: Arbaco, Juunyo 15, 2016

Warar Kooban

Bishii Diseembar, waxaan sharaxnay marxalad cusub oo ka jirta jawiga hanjabaadda guud, taasoo saamaynaysa waddanka. Qiimeyntaan aasaasiga ah isma baddalin. Jawigaan, waxaan si gaar ah uga walwalnaa dagaalka xag jirka ku barbaaray waddanka ee geysan kara dhufasho, lagana helin ama laga helo ogeysiis yar. Dhacdooyinka murugada leh ee ka dhacay Orlando dhowr maalin ka hor waxay xoojiyaan tani. Sidaas darteed, kordhinta feejignaanta iyo ka war haynta dadweynaha waxay leeyahiin muhiimadda ugu badan. Wargelintaan waxay socon doontaa muddo shan-bil ah, waxayna dhici doontaa wax yar ka hor inta aan la gaarin xilliga fasaxa. Waxaan dib u qiimeyn doonaa hanjabaadda argagixisada waqtigaas.

Muddada

Waxa la soo saaray: Juunyo 15, 2016

Waxay dhicaysaa: Nofeembar 16, 2016

Tafaasiisha

- Illaa iyo markii la soo saaray Wargelintii kowaad ee bishii Diseembar, ma yaraanin walwalka aan ka qabno in xag jirka dagaalka lagu dhalliyo in ay weerar ka fulliyaan gudaha Mareykanka.
- Inkastoo aan ogsoonahay in aysan jirin xog gaar ah oo lagu kalsoon yahay waqtigaan oo ku saabsan qorsho ay soo abaabuleen urarada argagixisada in ay soo weeraraan waddanka, xaqiiqada waxay tahay in dadka argagixisada dhiiri geliso fulliyeen, ama isku dayeen in ay weerar ka fulliyaan gudaha Mareykanka.
- DHS waxay si gaar ah uga walwalsan tahay in ay dhici karto in dadka ay argagixisada dhiiri geliso iyo xag jirka dagaalka ee ku barbaaray waddanka lagu dhiiri geliyo ama lagu dhalliyo in ay bartilmaameed ka dhigtaan munaasabadaha ama goobaha dadweynaha.
- Sida aan ku aragnay weerarkii ka dhacay San Bernardino, Paris, Brussels, iyo, dhawaanahaan Orlando, argagixisada waxay ku fakari doonaan xulasho balaaran oo kala duwan kana dhigtaan bartilmaameedyo la weeraro.
- Isticmaalka aragagixisaduInternetka u isticmaalaan si ay dadka ugu dhiirigeliyaan dagaal ama si ay ugu biiraan safarkooda waa arrin weyn oo laga walwalo.
- Jawiga aan iminka ku jirno, DHS waxay kaloo ka walwalsan tahay hanjabaadda iyo dagaalka loo geysto bulshooyinka qaar iyo dadka qaar ee daggan waddanka, taasoo ku saleysan diinta loo maleeyo in ay haystaan, jinsiyaddooda, qaranka ay u dhasheenama dareenkooda galmada..

Dadaalka Ka Hortagga Argagixisada Dawladda Mareykanka

- DHS iyo FBI waxay wadaan in ay siiyaan hay'adaha aan xiriirka la leenahay ee gobollada iyo deegaannada talooyin lagu kordhinayo ammaanka. Bilaaha soo socda, dadweynaha waxay arki doonaan ciidamada amniga oo lagu kordhiyaygoobaha dadweynaha iyo munaasabadaha. Tani waxaa ka mid noqon kara xadidaad iyo baaritaan dheeraad ah oo lagu soo rogo boorsooyinka, kooxo badan oo ka tirsan K-9, iyo isticmaalka farsamooyinka baarista.



Siistemka Digniinta Argagixisada Qaranka National Terrorism Advisory System

Wargelinta

www.dhs.gov/advisories

TAARIKHDA LA SOO SAARAY: Arbaco, Juunyo 15, 2016

- FBI waxay baaritaan ku haysaa hawlo sida suurtoogalka ah la xariira-argagixisada ee qeyb ka ah hanjabaadda ka jirta Mareykanka oo idil. Madaxda federaalka, gobollada, iyo deegaannda waxay isku duwayaanfalal badan oo nabadsugid ah iyo inay hagaajiyaan xariirka lala leeyahay bulshada si wax looga qabto hanjabaadda soo kordheysa.

Noocyada Digniinta

Wargelinta

Waxay sharaxdaa xaaladaha iminka jira ama sasaanka guud ee ku saabsan hanjabaadda argagixisada.

Digniinta Sare

Waxay ka digtaa hanjabaadda argagixisada lagu kalsoonaan karo kana soo horjeeda Mareykanka.

Digniinta Degdegga

Waxay ka digtaa hanjabaadda argagixisada, nala soo daristay, cayiman, lagu kalsoonaan karo kana soo horjeeda Mareykanka.

Sida Aad u Kaalmeyn Kartid

- Waxaad waxyaabaha la tuhmo u sheegtaa hirgelinta sharciga ama saraakiisha ammaanka dadweynaha ee sida ugu wanaagsan u habbeysan in ay ka jawaabaan kana bixiyaan tafaasiil cayiman oo ku saabsan tilmaameyaasha argagixisada.
- Waxyaabaha la tuhmo ama macluumaadka ku saabsan hanjabaadda waxaa kaloo la gaarsiin karaa [Fusion Centers](#) iyo [Xafiisyada Dibadda FBI](#) - qeyb ka tirsan Qorshaha Wargelinta Waxyaabaha La Tuhmo ee Qaranka (Nationwide Suspicious Activity Reporting Initiative).
- Baro [sida loo aqoonsado calaamadaha qorsheynta ka horeeyo hawlgalka](#) ee la xariirta argagixisada ama hawlaha dambiyada kale.

Diyaar Ahaw

- Isu diyaari kordhinta sugidda ammaanka iyo horay u qorsheyso kuna talagal dib u dhac iyo waxyaabaha la xadiday/la mamnuucay.
- Meelaha dadka ku badan yahay, mas'uul ka noqo ammaankaada shakhsiga. Madaxa ku haay meelaha sida dedegga ah looga baxo iyo meelaha laga helo shaqaalaha ammaanka ee ugu dhaw. Waxaad telefoonada gacanta ku haysataa jeebabkaada baddalkii aad gashan lahayd boorsooyinka ama aad saaran lahayd miisaska si aadan u lumin marka wax dhacaan. Mar kasta, qaado tafaasiisha xariirka degdegga iyo macluumaadka baahida gaarka. Si aad u heshid macluumaad badan, booqo [Ready \(Diyaar\)](#).



Siistemka Digniinta Argagixisada Qaranka National Terrorism Advisory System

Wargelinta

www.dhs.gov/advisories

TAARIKHDA LA SOO SAARAY: Arbaco, Juunyo 15, 2016

Xogogaal Noqo

- Dawladda Mareykanka waxay bixin doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hanjabaad kasta oo soo if baxda isla marka la helo macluumaad dheeraad ah. Dadweynaha waxaa lagu dhiiri geliyaa in ay dhageystaan hirgelinta sharciga deegaanka iyo saraakiisha ammaanka dadweynaha.
- Waxaan ku dhiirigelineynaa Mareykanka in ay sii wadaan in ay safraan, tagaan munaasabadaha dadweynaha, iyo in ay si madax banaan ula xariiraan dadka kale balse adkeyaan feejignaanta lana socdaan agagaarka.
- Waaxda Arrimaha Dibadda (Department of State) waxay soo saartaa [la socodsiiin iyo digniin ku saabsan safarada caalamiga](#).

Haddii Aad Aragtid Shay, Sheeg Waxa Aad Aragtay™

Waxaad waxyaabaha la tuhmo u sheegtaa hirgelinta sharciga ama wac 911.

Siistemka Digniinta Argagixisada Qaranka (National Terrorism Advisory System) waxay Mareykanka siisaa macluumaadka digniinta ee ku saabsan hanjabaadda sugidda ammaanka waddanka. Waxaa qeybiya Waaxda Sugidda Ammaanka Waddanka (Department of Homeland Security). Waxaad macluumaad badan ka heli kartaa:

<http://www.dhs.gov/advisories>. Si aad u heshid wararkii ugu dambeyay, laguuguna soo diro telefoonka gacanta:

<https://twitter.com/dhsgov>.

Haddii Aad Aragtid Shay, Sheeg Waxa Aad Aragtay™ la isticmaalay kaddib marka ruqsad laga qaatay Madaxda Gaadiidka Magaalada NY (NY Metropolitan Transportation Authority).